MACLUUMAADKA HEERARKA LACAGEED EE BARNAAMIJKA WA CARES

Maadaama uu WA Cares bixinayo qaddar lacageed oo xaddidan inta aad nooshahay, waxaa habboon in aad si taxadar leh u qorshaysato isticmaalka lacagtaada. Si aad uga dhigto cayrtaada mid muddo dheer ku hayso, tixgeli bal inaad baahiyahaaga daryeel ku dabooli karto adeegyo ku baxa kharash yar, sida daryeelka iyo taageerada lagu heli karo guriga. Maanka ku hay in kharashaadka adeegyadu ay kala duwan yihiin iyadoo loo eegayo halka aad deggan tahay iyo baahiyahaaga daryeel. Waxa kale oo laga yaabaa inaad rabto inaad qiimaha weyddiiso bixiyeyaal dhowr ah ka hor inta aadan mid dooran.

Adeeg ama taageero kasta oo caymisku daboolayo wuxuu leeyahay heerka ugu sarreeya ee lacagta. Bixiyeyaasha adeeggu kaama qaadi karaan lacag ka badan heerka ugu sarreeya, kumana weyddiisan karaan inaad bixiso lacag dheeraad ah oo jeebkaaga ah.

Waxaad isticmaali kartaa baaxadda qiimaha hoos ku qoran si aad u hesho fikrad guud oo ku saabsan inta ay ku kici karaan adeegyada iyo taageerooyinka. Heerarkan lacageed ma dammaanad qaadayaan kharashka ku baxa adeeg kasta.

Wixii macluumaad ah ee ugu dambeeyay, booqo wacaresfund.wa.gov/rates.

QALABKA IYO TIKNOLOJIYADDA KA CAAWISA LA QABSIGA HAWLAHA DADKA BAAHIYAHA GAARKA AH QABA

MAGACA ADEEGGA	BAAXADDA KHARASHKA CAADIGA AH	HEERKA UGU SARREEYA EE LACAGTA
Qalabka iyo tiknolojiyadda ka caawisa la qabsiga hawlaha dadka baahiyaha gaarka ah qaba	Agabka farsamada gargaarka ah ee caawiya dadka baahiyaha gaarka ah qaba, sida qalabka dawooyinka, badqabka, aragga iyo tacaamulka: Ilaa $15,450 shay kasta (Sida caadiga ah waa wax ka yar $500 shay kasta)	$15,450 halkii iibsi
	Adeegyada tiknoolojiyadda ee loogu talagalay gaar ahaan dadka baahiyaha gaarka ah qaba: $200 halkii adeeg	
	Qalabka caafimaadka: $10-$3,000 shay kasta	
	Qalabka musqusha: $15-$3,000 shay kasta	
	Agabka kaadi-ceshan la’aanta: $10-$250 shay kasta bishiiba	
	Qalabka iyo agabka gaarka ah(aan caafimaad ahayn): $10-$5,000 shay kasta	
	Bedelaadda baabuurta: Ilaa $15,450 halkii bedelaad	

TAAGEEROOYINKA KA-FAA'IIDAYSTAHA IYO DARYEEL BIXIYAHA		
MAGACA ADEEGGA	**BAAXADDA KHARASHKA CAADIGA AH**	**HEERKA UGU SARREEYA EE LACAGTA**
Daryeelka dadka waaweyn ee maalintii, oo ay ku jirto daryeelka nastiinta	$75-$338 maalintii Nastiinta: $11 halkii 15 daqiiqo	$338 maalintii
Caafimaadka dadka waaweyn ee maalintii	$75-$338 maalintii	$338 maalintii (waxay ka dhigan tahay maalin buuxda oo 8-saac ah)
Dhimir-beelka iyo taageerada dabeecadda	$25-$42 halkii 15 daqiiqo ($100-$168 saacaddii)	$42 halkii 15 daqiiqo ($168 saacaddii)
Waxbarashada iyo la-tashiga	Tababarka iyo horumarinta xirfadaha: ilaa $83 halkii 15 daqiiqo ($320 saacaddii) Barnaamijyada ku fadhiya caddaynta cilmiyeed: $200-$1,040 halkii barnaamij	$83 halkii 15 daqiiqo ($320 saacaddii) $1,040 halkii barnaamij
Shaqada guriga iyo hawlaha dibadda	$5-$16 halkii 15 daqiiqo ($20-$64 saacaddii) ilaa $412 bishiiba	$16 halkii 15 daqiiqo ($64 saacaddii) iyadoo aanay ka badnaanayn $412 bishiiba
Shaqada barxadda iyo baraf ka sifaynta	$10-$36 halkii 15 daqiiqo ($40-$144 saacaddii), ilaa $412 bishiiba	$36 halkii 15 daqiiqo ($144 saacaddii) iyadoo aanay ka badnaanayn $412 bishiiba

ADEEGYADA DARYEELKA SHAQSIYADEED EE GURIGA IYO DARYEELKA NASTIINTA EE GURIGA		
MAGACA ADEEGGA	**BAAXADDA KHARASHKA CAADIGA AH**	**HEERKA UGU SARREEYA EE LACAGTA**
Wakaaladaha daryeelka guriga	$8.75-$12 halkii 15 daqiiqo ($35-$48 saacaddii)	$12 halkii 15 daqiiqo ($48 saacaddii)
Consumer Direct Care Network Washington (loo-shaqeeyaha bixiyeyaasha gaarka ah)	Heerka caadiga ah: $9.81 halkii 15 daqiiqo ($39.24 saacaddii) Heerka qoyska (waxaa heli kara ka-faa'iidaystayaasha shaqaalaysiinaya ehelka u shaqayn doona wax ka yar 20 saacadood toddobaadkii): $7.97 halkii 15 daqiiqo ($31.88 saacaddii) ⓘ Heerarka lacagtu waa go'an, waana isbeddeli karaan xilli kasta	

CUNTOOYINKA IYO GAADIIDKA

MAGACA ADEEGGA	BAAXADDA KHARASHKA CAADIGA AH	HEERKA UGU SARREEYA EE LACAGTA
Cuntooyinka guriga loogu keeno	Keenidda fool-ka-foolka ah: $8-$9 halkii cunto Keenidda boostada: $8.50-$16 halkii cunto	$16 halkii cunto
Gaadiidka	$35-$50 halkii qaadis, oo lagu daray $3-$5 halkii mayl iyo kharashyo dheeraad ah oo loogu talagalay wakhtiga sugitaanka, ka soo bixitaanka isbitaalka, nooca gaadhiga, saacadaha dambe, iwm. Celceliska qiimaha safarka gaadiidka la wadaago ee 6-mayl ah: • Washington: $25-$28 • Seattle: $35-$38	Ilaa $412 bishiiba adeegyada gaadiidka, iyadoo lagu daray kharashka maylka ama safarka 260 mayl bishiiba iyadoo la raacayo heerka maylka ee federaalka

CAAFIMAADKA IYO SOLAANKA

MAGACA ADEEGGA	BAAXADDA KHARASHKA CAADIGA AH	HEERKA UGU SARREEYA EE LACAGTA
Iskudduwidda kala-guurka daryeelka	$120-$374 bishiiba	$374 bishiiba ilaa laba bilood oo isku xigta
Wakiilashada hawsha kalkaaliyaha	$10-$16 halkii 15 daqiiqo ($40-$64 saacaddii)	$16 halkii 15 daqiiqo ($64 saacaddii)
Kalkaalin caafimaad oo xirfad leh	$10-$36 halkii 15 daqiiqo ($40-$144 saacaddii)	$36 halkii 15 daqiiqo ($144 saacaddii)
Kalkaalin caafimaad oo gaar ah	$25-$68 halkii 15 daqiiqo ($100-$272 saacaddii)	$68 halkii 15 daqiiqo ($272 saacaddii)

BADBAADADA GURIGA

MAGACA DEEGGA	BAAXADDA KHARASHKA CAADIGA AH	HEERKA UGU SARREEYA EE LACAGTA
Bedelaadda/ habaynta agagaarka guriga	Musqulaha iyo qolalka hurdada ee la heli karo: $100-$35,000	Ilaa qaddarka buuxa ee lacagta ka-faa'iidaysiga
	Ilayska la heli karo: $20-$6,000	
	Qalabka albaabada si toos ah u fura: $400-$6,000	
	Wiishka saqafka la raaco: $1,500-$8,000	
	Ballaarinta albaabka iyo marinnada: $300-$40,000	
	Albaabada gurmadka: $2,600-$5,600	
	Biraha qabsashada: $85-$500	
	Sallaanada jiifka ah (ramps): $1,000-$5,000	
	Wiishka sallaanka iyo wiishka balandada: $1,500-$6,000	
Qiimaynta badbaadada guriga	$200-$300 saacaddii	47 halkii 15 daqiiqo, iyadoo aanay ka badnaanayn $300
Nidaamka gurmadka degdegga ah ee shakhsiga ah	Rakibaadda: $0-$103 Adeegga bishii: $19-$40 Adeegyada lagu daro (oo ay ku jiraan xusuusinta dawooyinka, goob-sheegaha GPS-ka iyo qalabka ogaada dhicitaanka): $10-$43	Rakibaadda: $103 Adeegga bishii: $85 bishiiba

DARYEELKA LAGU BIXIYO GOOBAHA GAARKA AH

MAGACA ADEEGGA	BAAXADDA KHARASHKA CAADIGA AH	HEERKA UGU SARREEYA EE LACAGTA
Guriga qoyska ee dadka waaweyn, oo ay ku jirto daryeelka nastiinta	$135-$473 maalintii	$473 maalintii
Xarunta daryeelka la caawiyo, oo ay ku jirto daryeelka nastiinta	$125-$562 maalintii Nastiinta: $6 halkii 15 daqiiqo	$562 maalintii
Guriga dadka lagu xanaaneeyo (nursing home), oo ay ku jirto daryeelka nastiinta	$260-$556 maalintii Nastiinta: $6 halkii 15 daqiiqo	$556 maalintii
Daryeelka xusuusta ee ku dhex yaalla xarunta daryeelka la caawiyo	$125-$624 maalintii	$624 maalintii